**Best Start Kindergarten Assessment**

**Information for parents and carers**

# Macluumaadka Qiimeynta Kindhada ugu Bilowga Wanaagsan ee

### loogu talagalay xannaaneeyayaasha iyo waalidiinta

Mudanayaal xannaaneeye iyo Waalidiin

Qiimeynta Kindhada ugu Bilowga Wanaagsan waxay ka dhici doontaa dugsigeena Xilliga 1.

Qiimeynta Kindhada ugu Bilowga Wanaagsan waa qiimeyn gobolka oo dhan ah oo ka caawineysa macalimiinta inay tusto xirfadaha tira barashada iyo akhriska iyo qoraalka ee ardey kasta bilowga Kindhada. Tani waxay ka caawineysaa macalimiinta inay qorsheeyaan casharada si ay si wanaagsan ugu taageeraan baahida waxbarasho ee ilmo kasta.

Carruurtu waxay la yimaadaan dugsiga khibrado fara badan, awoodo iyo xirfado. Qaarkood way yaqaanaan buuggaagta, waxay aqoonsan karaan xarfaha alifbeetada ama xitaa waxay qori karaan magacooda ama waxay tirin karaan ilaa toban, iyadoo kuwa kale aysan baran xirfadahan.

Qiimeynta Kindhada ugu Bilowga Wanaagsan waxay siisaa macalimiinta fursado ay ilmaha ula fariistaan mid mid, iyagoo xoogga saaraya waxa ilmahaasi sameyn karo.

Qiimeyntu ma aha imtixaan laakiinse waxay siineysaa macalimiinta macluumaad faa’iido badan si uu uga caawiyo taageerada waxbarashada ilmahaaga ee dugsiga. Haddii aad dooneysid inaad kala baxdid ilmahaaga ka qaybqaadashada qiimeeynta, fadlan dugsiga la xiriir.

Warqada macluumaadka ku lifaaqan waxay kaa siineysaa macluumaad dheeraad ah Qiimeynta Kindhada ugu Bilowga Wanaagsan.

Fadlan la xiriir dugsiga haddii aad qabto wax su’aalo ah oo ku saabsan Qiimeynta Kindhada ugu Bilowga Wanaagsan.

## Adeegga Turjumaanka Taleefanka

Haddii aad u baahan tahay turjumaan inuu kaa caawiyo adiga inaad dugsiga la xiriirto, fadlan ka wac Adeegga Turjumaada Taleefanka 131 450 oo ku weydiiso turjumaan luuqadaada ah. Turjumaanka ayaa wici doona dugsiga wuxuuna ku jiri doonaa khadka si uu kaaga caawiyo wadahadalka. Adeeggan waxba lagaama qaadi doono.

Maamulaha